Waxbarashada degamada dadka waa way nee Iswiidhiska loogu tal galay muhaajiriinta (SFI)

Waxbarashada degamada dadka waa way nee Iswiidhiska loogu tal galay muhaajiriinta (SFI) waa waxbarasho loogu tala galay qofka u baahan waxbarashada asaasiga ah ee luqadda iswiidhishka. Waxaad baraneysaa inaad qortid kuna hadashid luqadda iswiidhishka ah adigoo xaalado kala duwan ku sugan. Haddii aadan aqoon sida wax loo akhriyo loona qoro waxaa lagu siinayaa fursad aad ku barato.

Waxyaabahaan ayaa ku baraneysaa sfi

Hadafka waa inaad baratid:

- akhriska iyo qoridda luqadda iswiidhishka
- hadalka, wada hadalka, akhrinta, dhageysiga iyo fahmidda iswiidhishka.
- sida loogu dhawaaqo ereyada
- adeegsanaya qalab farsamo oo ku habboon baridda
- inaad waafijisid luqadda hadba qofka aad la hadleysid iyo xaaladda markaas la joogo
- sida loo barto luqadda
- shorshe ah sida loo wada xiriiro

Sfi waa lacag la'aan

Waa bilaash inaad wax ka dhigatid waxbarashada luqadda iswiidhishka ah ee loogu tala galay dadka waaweyn sfi. Bugaag iyo qalab kale ee waxbarasho waxeey ku jiraan qaabka waxbarashada. Qarash yar in aad lagaa qaado weey dhici kartaa. Markii aad dhiganeeysid barashada luuqada iswiidhishka ee ajaanibta (sfi) kuma heli kartid lacagta kaalmada ardayda ee ka socoto Hey'adda kaalmeeynta waxbarashada (CSN).

Tala siinta dhinaca waxbarashada iyo xirfadaha

Haddii aad arday tahay waxaad xaq u leedahay tala siin dhinaca waxbarashada iyo xirfadaha ah. Waxaad ka heleysaa warbixin ku saabsan waxbarashooyinka kala duwan, shuruudaha lagu galo, xirfadaha kala duwan iyo baahida xirfadahaas looga qabo suuqa.

Marabtaa inaad warbixin dheeraad ah ogaatid?

La xiriir degmadaada haddi aad rabtid inaad biloowdid sfi. Macluumaadka dadka lala xiriirayo waxaad ka heleysaa degmada boggeeda internetka ah.

Yaa wax ka baran kara sfi?

Laga billaabo bisha luuliyo ee sanadka aad buuxineysid 16 sano waxaad billaabi kartaa barashada luqadda iswiidhishka ah ee sfi. Qofka eey da'di-isu intaas ka weyn tahay wuu bilaabi karaa waxbarashada sfi. Waa inaad degantahay wadanka Iswiidhan isla markaana aadna heysan aqoonta asaasiga ah ee luqadda iswiidhishka.

Sidaan ayeey waxbarashada u dagsantahay

Waxaad kororsaneysaa aqoon iyo khibrado badan waana muhiim in laba-doodubada lagu dhaganyahay marka aad waxbaraneysid. Marka waxbar-ashada la qorsheynayo adiga ayaa lagula tashanayaaa si loo waafajiyo waxa aad adiga jeceshahay iyo hadafka aad ka leedhaay.

Maadaama waxbarashada sfi loogu tala galay dad meelo badan oo kala duwan kasoo jeedo, aqoon iyo hadafyo kala duwanna heysta waxeey dadka ku qaadataa muddooyin kala duwan ineey akhristaan koorsooyin-ka. Sidaas darteed dad kala duwan ayaa markasta billaaba oo dhameeya koorsooyinka.

Waxaad xaq u leedahay 15 saacadood oo waxbarasho ah isbuuc walba waqti ka kooban qiyaastii afar isbuuc. Waqtiga waxbarashada intaas waal-aga yareeynayaa haddii la dareemo inaad sii fiicnaaneysid oo kaligaa is bari kartid.

Waxaad waxbarashada sfi:ga raacin kartaa shaqo, baraktiik ama waxbar-asho kale sida waxbarasho dugsi sare, waxbarashada dadka waaweyn ee degmada.

Waxaad fursad u heli kartaa inaad qeyb ka mid koorso ku dhigatid goob shaqo. Waxaa lagu magacaabaa waxbarashada lagu dhigto goob shaqo (apl). Waa mid ka mid ah siyaabaha kala duwan ee lagu barto luqadda iswiidhishka ah ee loo baahan yahay in la barto si looga qeybgalo shaqo nololeedka.

Waddooyin waxbarasho iyo koorsooyin
SFI wuxuu leeyahay seddax waddo oo waxbarasho, 1, 2 iyo 3. Waddada 1 ee waxbarashadu waxaa loogu tala galay adigaaga aan wax akhrin karin, waxna qori karin ama leh waxbarasho dambe oo aad u gaaban halka waddada

waxbarashada 3 loogu tala galay adigaaga waxbarashada horay u soo caad-eystay. Waddo kasta oo waxbarasho waxay ka koobantahay koorsooyinka A, B, C iyo D:

- Waddada 1 ee waxbarashada: koorso A, B, C iyo D.
- Waddada 2 ee waxbarashada: koorso B, C iyo D.
- Waddada 3 ee waxbarashada: koorso C iyo D.

Koorso iyo waddo kasta oo waxbarasho ka dib waad joojin kartaa waxbarashada haddii aad doontid. Laakiin waxaa lagu siinayaa fursad ah in aad dhigatid ilaa iyo koorsada D, iyada oo aan la eegeynin heerka aad ka billawday.

Qorshe waxbarasho oo gaar ahaaneed
Adiga ka arday ahaan waxaad leedahay qorshe waxbarasho oo adiga khaas kuu ah. Iskoolka ayaa jaangoynaya qorshaha waxbarasho isagoo adiga kula kaashanaya. Waxuu qorshaha ka koobanyahay:

- hadafkaada waxbarasho iyo
- waxbarashadaada dhirirkeedu inta uu la egyahay.

Qorshahaada khaaska ah waa la baddali karaa haddii aad rabtid inaad koorsooyin badan akhrisatid ama haddii aad rabtid inaad beddeshid hadafkaada waxbarasho inta lagu guda jiro waqtigaada waxbarashada.

Natiijo
Natiijooyinka uu isticmaalo dugsiga waxbarashada dadka waaweyn waa A-F, waa sida tan laga isticmaalo dugsiga hoose dhexe iyo kan dugsiga sare. A natiijada ugu sarreeyso F:na waa marka uu qofka ku dhaco. Koorso kasta markeey dhamaato ayaa natiijo lagu helaa. Aqoontaada waxaa lagu xaqiijinayaa oo lagu qorayaa shahaado.

Imtixaan ka qaadis – sidaan ayuu u dhacayaa
Haddii aad rabtid inaad natiijo ka heshid maaddooyinka laga dhigto dugsiga waxbarashada dadka waaweyn, wadankana aad degantahay waxaad xaq u leedahay inaad imtixaan ku gashid koorsooyinka imtixaan lagu galo oo dhan. Imtixaan waxaad kaloo ku gali kartaa qoraal cilimiyeedka lagu sameeyo dugsiga sare. Imtixaanka waxaa kaliya oo lagu sameyn karaa degmo qabanqaabisa imtixaanka koorsada aad rabtid inaad imtixaan ku gashid.

Waxaa jira fursad aad imtixaan ugu sameyn kartid koorso aad hore natiijo ugu heshay.

iskoolka waxaa fursad loo siinayaa inuu khidmad ku qaato diyaarinta imtixaanka. Khidmadda ma dhaafi karto 500 oo karoon.

Qiimeyn – in qiimeyn lagu sameeyo aqoonta aad hore usoo dhigatay Waxaa jira fursad laguugu qiimeynayo laguugana dokumentigareeynayo waxbarashada iyo khibradaha aad hore usoo baratay. Ujeedada qiimeynta loo sameynayo waxeey ahaan kartaa:

- inaad rabtid inaad waxbaratid oo aad is waafijisid waxa eey waxbarashada ka koobantahay iyo mustawaheeda si aadan u akhrisanin wixii aad horay usoo baratay
- inaad soo gaabisid waqtiga waxbarashada
- inaad dokumentigareeysatid waxbarashadaada si aad u tusisid tusaale ahaan marka aad leedahay waraysi shaqo.

Haddii aad rabtid inaad qiimeyn ku sameysid waxbarashadaada, waxaad la xiriirtaa degmadaada.

Waxbarashada luqadda dadka waaweyn ee Sfi ee iskoolka dadka waaweyn

Waxaad fursad u leedahay inaad waxbarashada sfi:ga ka dhigatid iskoolka waxbarashada dadka waaweyn intii aad baddelkeed aadi laheyd dugsiga barashada sfi:ga ee degmada maadaama eey iskoollada waxbarashada dadka waaweyn eey ayagana baxshaan waxbarashada sfi:ga. Haddii aad rabtid inaad sfi:ga ka akhrisatid iskoolka waxbarashada dadka waaweyn, waxaad la xiriirtaa degmadaada.